



The Transitional Federal Government of the Somali Republic
Office of the Prime Minister

Ref: XRW/Press release 0020/08/11

Date: 06 August 2011

Al-Shabaab oo laga baacsaday Muqdisho

Mogadishu, 06 August, 2011

Ciidanka Dowladda oo kaalmo ka helaya AMISOM ayaa maanta ku guuleystay inay magaalada Muqdisho ka xorreeyaan kooxaha xag jirka ah ee Al-Shabaab oo ku xiran kooxda Al-Qaeda.

Al-Shabaab waxey ku qasbanaadeen inay ka cararaan magaalada Muqdisho, tan oo daba joogtay dagaalo usbuucyadii la soo dhaafay ay ciidamada dowladda kula jireen kooxahaas, tanoo looga hortagayey inay waxyeelo gaarsiiyaan kaalmada bani'aadanimo ee lasiinayo shacabka Soomaaliyeed. Weerar gaadmo ah oo ay xalay isku dayeen ayaa sababay in la baacsado oo ay difaacanwaayaan goobahoodii. Waxaa hadda lagu soo waramayaa in cararkoodu gaarsiisanyahay meelo u jira caasimadda 100 km.

Ra'iisul Wasaaraha Soomaaliya Dr Cabdiweli Maxamed Cali oo u hanbalyeynayey ciidanka Dowladda ayaa yiri "Tani waa guul u soo hoyatay ummadda Soomaaliyeed, waana talaabo weyn oo horey loogu qaaday baa'bi'inta xagjireyaasha. Muddadii 3dii sano ee u danbeysay baa si xoog leh loo sugayey maalintan oo kale.

"Tani waa maalin aad u weyn, oo noo horseedeysa in la xasiliyo dalka. Saaxadihii la soo dhaafay sida ay u carareen isla markaana u dhaqmeen xagjireyaasha ayaa waxey na tuseysaa inaysan marnaba rabin nabad ka dhalata dalka oo uu fikirkoodu ahaa mid dibedda laga soo minguriyey."

Ra'iisul Wasaaraha ayaa sheegay in Dowladdu ay amnigii iyo kala danbeyntii ku soo celineyso goobaha ay ka carareen Al-Shabaab, iyadoo la qiimeynayo baahida shacabka si loo gaarsiiyo kaalmooyin bani'aadanimo. Kooxaha xagjirka ah falalkooda guracan ee waxashnimadaha leh ayaa sababay in macluul ba'an ay ka dilaacdo dalka. Hadda waxaa jirta fursad ay heystaan beesha caalamka iyo hay'adaha gar-gaarka ah si ay u xoojiyaan dadaalkooda gar-gaarka bani'aadanimo.

Muqdisho xorreynteedu waxey ku timid ka dib markii ay is biirsadeen dhowr waxyaalood oo ay ka mid ahaayeen dagaaladii laga soo bilaabo bishii April 2011 lala galay oo maalin walba looga qabsanayey goobo muhiim ah. Tan iyo muddadaas waxey luminayeen goobo muhiim ah iyo kalsoonidii shacabka. Waxey aheyd usbuucii la soo dhaafay ka dib markii ciidamada dowladda ay gudaha u galeen Suuqa weyn ee Bakaaraha oo ay kooxaha Al-Shabaab ka heli jireen lacago sharci darro ah oo ay ku qasbi jireen ganacsatada Soomaaliyeed.

- DHAMAAD -